



Macluumaadka cusub ee shaqaalaysiinta kormeeraha guud: Talo soo jeedinta musharixiinta la codsaday, wareysiga suurta galka ah ee la qorsheeyay

Shaqaalahi iyo qoysaska PPS ee qaaliga ah,

Xagaagii wuu bilowday, balse waxaan rabaa in idinla socodsiyo in Kooxda Hawl fulinta PPS ee ku qaabilsan Shaqaalaysiinta Kormeeraha Guud ay sii wadaan in ay u kulmaan si joogto ah isla markaana shaqadu socoto maalin kasta si hore loogu sii wado dadaalada lagu raadinayo isla markaana lagu shaqaaleysiinayo kormeeraheena guud ee soo socda. Wuxaan haynaa sharaxaada booska oo kama dambays ah isla markaana waxaanu weli si firfircooni u qoraynaa musharixiin. Waanu idiinka mahad celinaynaa fikrada aad dhiibateen iyo talo soo jeedinta musharaxa ee aanu ilaa hada ka helnay bulshada. Hoosta waxaa ku qoran tilmaamaha kulankayagii u dambeeyay. Waanu idinla soo socod siin doonaa hadba sida aan hore ugu socono. Waad mahadsan tiihiin.

Julia Brim-Edwards, Guddoomiyaha, Kooxda Fulinta Shaqaalaysiinta Kormeeraha Guud

Tilmaamaha ka socda kulanka kooxda hawl fulinta ee Juun 14:

Talo soo jeedinta loogu talagalay musharixiinta suurta galka ah: Wax ka badan 30 musharax ayay soo jeediyeen xubnaha Guddigu, iyo xubnaha guddiga la doortay, shaqaalahi iyo bulshadu. Urrurka dibada shaqaalahi ka raadiya ee aan leenahay ayaa dib u eegaya aqoonta ay leeyihii musharixiinta la soo jeediyay isla markaana la xiriiraya kuwa leh sifooyin u dhigma sharaxaada booska looga baahan yahay. Xubnaha bulshadu waxay musharixiinta u qalanta u soo jeedin karaan Guddiga iyaga oo emailkan u diriya, PPS-Supt-Recruitment@pps.net, iyada oo sharaxaada booska oo kama dambays ah laga helayo website-ka PPS. Ka hor intaan la dhamaystirin taladii laga dhiibtay sharaxaada booska ayaa laga codsaday shaqaalahi dugsiga kuwaasi oo ay ka mid yihiin wakiilada macalliniimta, maamulayaasha, iyo shaqaalahi.

Magdhowga suuqa ee dib loo eegay: Xogta magdhowga oo ka socota kormeerayaasha guud ee Washington iyo Oregon ee degmooyinka waaweyn-kuwa yar yar ayaa la isku soo ururiyay iyada oo la arkay isbarbardhiga dugsiyada degmada/magaalooyinka ee leh kharashka nolosha oo la barbardhigi karo kuwa Portland. Dhammaadka Juun, Kooxda Hawl fulintu waxay soo jeedin doontaa qiyaasta kala duwan oo la xiriirta heshiiska magdhowga.

Wareysiga iyo nidaamka shaqaalaynta: Nidaam buuxa oo wareysi ayaa laga wada hadlay isla markaana Kooxda Hawl fulintu waxay soo jeedin doontaa in ay Guddigu haysato fursad ay ugu xirnaata isla markaana qaabab kal duwan ay ugu lug yeelato mashusharixiinta taasi oo ay dheer tahay dheer wareysiga guddigu dadka la yeelanayo ee rasmi ah.

Tallaabooyinka xiga: Guddigu waxay qorshaynaysaa jadwalka kulan shaqo oo dadweyne iyo kulan fulineed oo gooni ah oo dhaca dhammaadka Juun si looga wada hadlo nidaamka, hab maamuuska, mashurixiinta la wareysanayo iyo wareysiyada musharixiinta suurta galka ah. Iyada oo la eegayo xagaaga ina soo gaaray, dadaal bartilmaameed laga dhiganayo isla markaana diirada lagu saarayo ayaa socda si loo helo tiro musharixiinta u qalanta isla markaana wakhtigan la joogo hore loogu sii wado nidaamka.

Kulanka xiga: 9 subaxnimo Talaadada, Juun 20.